

## **Miisaaniyad ku salaysan Ahmiyad siinta/ Qorshe Sheeko Daabacan oo Istaraatiijiyadeed oo Xog ururin**

Sanadki 2012, waxaanu ku qaadanay qaybta wanaagsan ee sanadka kala qayb qaadashada wakiilada bulshadda, Shaqaalaha magaalada, iyo hogaamiyayaasha Magaalada si ay u horumariyaan qorshaha istaraatiijiyada ee hagi doonta Magaalada Tukwila falalkeeda iyo maalgalinta shanta ilaa tobanka sanadood ee soo socda. Hadda waa 2018, lix sano ka dib markii qorshahan la qoray. Markaanu bilownay nidaamka qaadashada miisaaniyada 2019-2020 iyaddoo la isticmaalayo qaabka miisaaniyad samaynta, Miisaaniyad samaynta Ku salaysan Ahmiyada, waxaanu doonaynaa inaanu habsano in qorshaha istaraatiijiyada ay muujin doonaan ahmiyadaha bulshadda iyo qiyamka.

2012, Magaaladu waxay qaadatay hiigsiga la wadaago in Tukwila ay noqon doonto "Magaalada fursada, doorashada bulshadda (The city of opportunity, the community of choice.)" Magaaladu sidoo kale waxay qaadatay hiigsi la wadaago: "Si loo bixiyo adeegyo aad u sareeya oo badbaado, marti qaad, iyo deegaan caafimaad leh oo dadka degan ah, ganacsiyada, iyo martida."

Magaalada sidoo kale waxay horumarisay afar hadaf:

1. Bulshadda Marti qaadaysa Xaafadaha & Degmooyinka Ganacsiga Firfircoon.
2. Aasaas Adaga oo loogu talo galay Dhammaan Dadka Degen Tukwila.
3. Dhaqaale kala duwan & Mid tartanle Gobol ahaan.
4. Mid si sare u Shaqeeya & Urur Saamayn leh.
5. Aqoonsiga Bulshadda Wanaagsan & Sawirka.

Haddii aad doonayso inaad barato wax badan oo ku saabsan Qorshaha Istaraatiijiyada, waad heli kartaa iyo wax badan oo ku saabsan websaydka: <http://www.tukwilawa.gov/2012StrategicPlan>

Markaas maxaad u malaynaysaa? Miyay hiigsiga, himilada, iyo hadafyada istaraatiijiyada weli muujiyaan ahmiyadaha bulshaddayada? Waxaan rabnaa inaan war kaa helno.

1. Maxaa guul laga gaadhaay ilaa 2012?
2. Maxay bulshaddayadu weli u baahantahay inay ka shaqayso?
3. Maxaad jeceshay ee ku saabsan hadafyada qorshaha istaraatiijiyada? Waxa adiga kuu muhiimka ah ee ay magaaladu ka fekerayso marka ay horumarinayso miisaaniyada?
4. Maxaad ka beddeli lahayd ee ku saabsan hadafyada qorshaha istaraatiijiyada? Maxaa la waayay?

Hadda oo aad haysatay fursadda aad kaga fekerato wax ku saabsan qorshaha iyo su'aalahan, ku soo biir bulshaddaada Aqoonkorodhsiga Bulshadda ee Khamiista Maayo 3<sup>aad</sup> laga bilaabo 6:00 ilaa 8:30 xaga Dugsiga Hoose ee Thorndyke. Waxaanu bixin doonaa cunto iyo daryeelka ilmaha, iyo adeegyada turjumaada waxaa la heli karaa marka la codsado. Kaalay oo dhegayso waxa jaarkaagu leeyihiin ee ku saabsan qorshaha istaraatiijiyada iyo miisaaniyada, naga caawi inaanu ahmiyada saarno faallo celinta oo qorno talada u dambaysa ee Gollaha Magaalada si looga fekero.

Ka dib Aqoon korodhsiga Bulshadda, waxaanu isku dari doonaa dhammaan faallo celinta, oo waxaanu usoo bandhigi doonaa isbeddelo kasta Gollaha Magaalada iyo bulshadda. Waxaanu adeegsan doonaa faallo celinta ka timid nidaamkan si loo caawiyo hagida miisaaniyada 2019-2020.

U dir xog qaadista la buuxiyay:

Mia Navarro  
City of Tukwila  
6200 Southcenter Blvd  
Tukwila, WA 98188

[Mia.navarro@tukwilawa.gov](mailto:Mia.navarro@tukwilawa.gov)  
(206) 406-6692

Turjumaada qoraalka iyo hadalka waxaa la heli kara marka la codsado.

1. Maxaa guul laga gaadhaay ilaa 2012?

2. Maxay bulshaddayadu weli u baahantahay inay ka shaqayso?

3. Maxaad jeceshay ee ku saabsan hadafyada qorshaha istaraatiijiyada? Waxa adiga kuu muhiimka ah ee ay magaaladu ka fekerayso marka ay horumarinayso miisaaniyada?

4. Maxaad ka beddeli lahayd ee ku saabsan hadafyada qorshaha istaraatiijiyada? Maxaa la waayay?